TAARIIKH

CUTUBKA -1AAD - SU,AALO & JAWAABO:

1) sheeg isirka dadka Cusmaaniyiinta?

Asalka cusmaaniyiintu waa turki

2) sharrax soo ifbaxa Dawladdii Cusmaaniyiintd?

Cusmaaniyiinta waxa ay soo galeen aasiyada yar qeybtii ugu danbeysay ee qarnigii 13aad iyaga oo soo galay xiliyo kala duwan ahaana qabiil kamid ah qabiilooyinkii turkiga oo kasoo barakacay meelo kamid ah bartamaha aasiya kuna siijeeday anatooliya waxaana hugaaminaayey ardhagaral.

3) qor warbixin ku saabsan asaasihii Dawladdii Cusmaaniyinta?

Ardhagaral markii uu dhintay sannadkii 1288di, wiilkiisii Cusmaan bin ardhagaral, oo ah kan dowladda loogu magac daray, ayaa loo magacaabay xukunka. Cusmaanwaxa uu kadhigay dawladdii cusmaaniyiinta mid dhan walba ka adag 25 sano oo uu xukumayey waxa uuna dhintay sanadkii 1358 CD isaga oo 70 jir waxaana lagu duugay magaalada buursah ee dalka turkiga.

4) Sheeg qarnigee Cusmaaniyiinta asaasmeen?

Waxaa la aasaasay "qarnigii 13aad"

5) Sheeg sanadkii Cusmaaniyiinta la'aasaasay?

Waxaa la'aasaasay sanadkii 1299 CD

6) Sheeg sanadkii Cusmaaniyiinta burbureen ?

Waxay burbureen 1923 CD

7) Sheeg Aasiyda yar intee loo yaqaanaa?

Waxaa loo yaqaanaa Anatooliya

8) Suldaan calaa'udiin saljuuqi boqortooyadoo xukumaye?

Boqortooyadii Salaajiqada.

9) Goormuu dhashay Goormuuna dhintay Suldaan calaa'udiin saljuuqi ?

Waxuu dhashay 1190 CD waxuuna dhintay 1237 CD.

10) Sheeg magaala madaxdii boqortooyadii Saljuuqa?

Waxay ahayd Gobolka nishaabuur caasimadiisa korasan.

11) Sheeg magaaladii Ar-dhagaral uu furtey?

Wuxuu furtay Askii shahar.

12) Sheeg magaala madaxda boqortooyadii biizantiinka ?

Waxay ahayd "konistantinobal"

13) Yaaka adkaadey boqortooyadii Salajiqada ?

Waxaa ka adkaadey Maguulka.

14) Sheeg Ninkii aasaasay dawlada cusmaaniyiinta ?

Waxaa aasaasay "Cusman bin Ar-dhagaral".

15) Sheeg imisa sano ayuu kudhintay cusman bin Ar-dhagaral ?

Wuxuu kudhintay "70jir" .

16) Markii ugu horeysay cusman yuu ladagaalmay ?

Waxuu ladagaalamay "biizantiinka" .

17) Sheeg wuxuu kula dardaarmay cusman caruurtiisa iyo saaxiibadiisa ?

Caruurteyda iyo saaxiibadeydow siiwada sareynta diinta islaamka kuna siiwada jihaadka Eebe dartiis gacantana kuhaysta Astaanta sharafta leh ee islaamka

18) Yaakala wareegay xilka cusman?

Wxaa kala wareegay wiilkiisa Orkhaan

19) Sheeg sanadkuu dhintay cusman ?

Waxuu dhintay sanadka markuu ahaa 1326 CD

20) Sheeg wax yaalahii uu qabtay Orkhaan adigo tirinaayo ?

- Dawlada waxa uu uqaybiyay gobolo
- buursa waxuu kadhigay magaalo madax
- lacagta wuxuu ku nashqadeeyay magaciisa
- Waxa uu habeeyay oo uu abuuray koox fardooley ah
- Waxa uu aasaasay kooxdii ugu horeysay ee ciidanka (inkishariyiinta) .

21) Sheeg ciidankii cusmaaniyiinta magacooda ?

Waxaa la'oran jiray ciidankii Inkishaariyiinta

22) Sheeg yaa xilka kala wareegay Orkhaan ?

Waxaa kala wareegay wiilkiisa " Muraad " .

23) Sheeg sanadkuu xilka qabsaday suldaan maxamed kii 2aad ?

Wuxuu qabsaday " 1451 " .

24) Sheeg sanadkii uu furtay konistantinobal Maxamed Al-faatix ?

Waxuu furtay sanadkii 1453 CD

25) Sheeg magacii loo aqoon jiray istanbuul ?

Waxaa loo aqoon jiray "konistantinobal" .

26) Sheeg magaalada Askuud wadanka ay kutaal ?

Waxay kutaala wadanka "Turkiga" .

27) Sheeg aasaasihii ciidanka milatariga cusmaaniyiinta ?

Waxuu aasaasay "Orkhaan" .

28) Sheeg 1512 ilaa 1520 maxay cusmaaniyiinta baadi goobeen ?

Waxa ay baadi gooben " sida ay u hooskeeni lahaayeen xukunkooda carabta bari iyo sidii ay ula dagaalami lahaayeen safwiyiinta iyo burtaqiiska" .

29) Sheeg sanadkuu dhacay dagaalkii jaaldiiraan ?

Waxuu dhacay sanadkii 1514 CD

30) Sheeg meeqa sano ayuu xilka haayey suldaan suleymaan qaanuuni ?

Waxuu xilka haayey "46 sano" .

31) Sheeg sanadkii ay furteen bilgarayd cusmaaniyiinta ?

Waxay furteen sanadku markuu ahaa 1521 CD

32) Sheeg sanadkii 1522 meelihii ay furteen cusmaaniyiinta ?

Waxa ay furteen " jaziirada roodis buuda zabooliya ".

33) Goorma ayay dhisteen cusmaaniyiinta ciidan badeed oo leh maraakiib dagaal ?

Waxa ay dhisteen xilligii uu xukunka haayey " Yaziid kii 2aad sanadkii 1886 CD

34) Sheeg suldaanada ugu caansan ee dalwada cusmaaniyiinta furashooyinka ?

- Suldaan Cusmaan
- Suldaan Orkhaan Gaazi
- Suldaan Muraad kii 1aad
- Suldaan Muxamad kii 1aad
- Suldaan Muxamad kii 2aad oo loo yaqaanay "Muxamad Al-faatix" .

35) meeqa sano ayuu xilka haayey suldaan Orkhaan Gaazi ?

Waxuu xukunka haayey "35 sano".

36) Goorma ayuu dhintay suldaan Muxamad Al'faatix ?

waxa uu dhintay sanadkii "1481" isaga oo "53 sano jir ah" .

37) Sheeg sababihii gudaha ahaa ee ka qayb qaatay tabardarrida dawlada cusmaaniyiinta ?

- Heshiis la'aan kadhex jirtay dadka ku hoos nool dawlada cusmaaniyiinta .
- Kafogaanshaha dawlada cusmaaniyiinta ay kafogaatay shareecada islaamka .
- Nidaamka xukunka oo noqdey kaligii talisnimo.
- Jahwareer dhaqaale iyo bulshadeed .

38) Sheeg waxyaabaha dibadda ee horseeday dhicitaankii boqortooyadii cusmaaniyiinta ?

- Jiritaanka xuquuq iyo mudnaan gaar ah oo loo fidiyay dalalka Yurub .
- Duullankii gumaystaha waxa uu saameyn ku yeeshay tabar darrida iyo burburka dawlada .
- Soo bixitaanka awood kale oo ah Ruushka .
- Guul darrooyinkii soo gaaray dawlada cusmaaniyiinta .

39. Sheeg suldaankii ugu caansanaa dawladdii cusmaaniyiinta?

Waa Suldaan cusmaan 1 iyo maxamed al faatix

40. muxuu ahaa nidaamkii maamul ee dawladdii cusmaaniyiinta?

Wuxuu ahaa saldano ama mid leyska dhaxlo.

TAARIIKH

Cutubka-2aad - Su'aalo & Jwaabo:

1. Tilmaan xuduudaha falastiin iyo bedka dhulkeeda?

Waqooyiga waxaa kaxiga suuriya iyo lubnaan, koofurtana masar iyo badda cas, barina urdun, galbeedkana badda dhexe. 27 kun oo km^2.

2. Goorma ayuu yimid nabi ibraahim dhulka falastiin?

J. 1900 CD

3. yey ahaayeen dadkii ugu horeeyey ee soogala falastiin?goorma ayeyse soogaleen?

Waxey ahaayeen kancaaniyiinta waxeyna soogaleen intii u dhaxeysay 3000 - 2500 NCH. waxaana lasoodagay aaraamiyiinta iyo fiiniiqiyiinta.

4. Tilmaan qaabka dhulka falastiin ?

Falastiin waa degaan leh cimilada badda dhexe ee dhexdhexaadka ah, kaas oo ku haboon degenasho iyo wax soo'saar, waxa uuna ukala baxaa dhul xeebeed siman, buuraleey iyo dhul boholo ah .

5. sharax sida ay qadiyadda falastiin ugu weyntahay muslimiinta?

Dhulka falastiin meel weyn oo kaga yaallaa muslimiinta, waxa ayna u arkaan dhul ladaahiriyay sida uu quraanka tilmaamay. Waana qibladii ugu horeysay muslimiinta, iyo masjidka 3aad oo loo safro in lagu tukado. Waana dhulkii Nabiyada, oo laga soo'saaray Nabiyaal badan .

6. Si kooban uga hadal xilliyadii ay falastiin soo'martey ?

Magaca falastiin waxa laga keenay dad kayimid badda iija , ama jaziirada takriit Aasiyada yar qarnigii 12aad dhexdiisa. Waxa ayna degeen xeebaha, magacoodana waxa uu ugu qornaa qoraalladii masaarida sidan (B L S T), waxa ayna gadaal karaaciyeen xarafka N oo carabi ahaan loo adeegsado. Sidaas ayeyna isugu milmeen iyaga iyo kancaaniyiinta, magacoodana dhulka loogu bixiyay .

7. Sheeg dadkii ugu horeeyay ee dega dhulka falastiin ?

Waxay ahaayeen Kancaaniyiin, aaraamiyiin iyo faniiqiyiin .

8. Sheeg sababaha keenay in qadiyadda falastiin ay soo ifbaxdo casrigan ?

- xadgudubyada joogtada ah ay israa'iil kula kaceyso shacabka falastiin.
- deegaameynta joogtada ah ee ay kawado dhulka falastiin.
- sheegashada israa'iil ee ah in qudus ay tahay caasimada israa'iil .

9. Kishmiir halkey kutaalaa?

Waxey kutaalaa waqooyiga fog ee qaaradda hindiya aagga koofureed ee aasiyada dhexe.

10. Sheeg bedka kashmiir iyo tirada dadkeeda?

Bedka kashmiir waa 240 kun oo km^2,dakeeduna waxa uu gaarayaa 12 milyan.

11. Goorma ayuu islaamku soogaaray kashmiir?

Wuxuu soogaaray qarnigii koowaad ee hijriyada gaar ahaan sanaddii 90 hijriyada.

12. Tilmaan goobaha ay kashmiir ka koobnayd inta aanay hindiya kala qeybin ?

Kashmiir waxay kutaal waqooyiga fog ee qaaradda Aasiya, aagga koonfureed ee Aasiyada dhexe, waxa ayna soohdimo laleedahay 4 dal oo kala ah : Bakistaan, Afgaanistaan, Shiinaha iyo Hindiya.

13. Tix dad'yoowgii kala duwanaa ee ku'noolaa kashmiir markii laqey'binayey ?

waxaa kamid ahaa : Hinduus, Muslimiin, Siikha iyo buudiyiin.

14. Sheeg awoodihii siyaasadeed ee kashmiir xakumayay markii laqey'binayey ?

Awoodihii siyaasadeed ee xukumayey kashmiir ka hor kala qeybinta waxa kamid ah. Ingiriiska Hindiya iyo bakistaan .

15. Falanqee qadiyadda kashmiir taariiq ahaan ?

Kashmiir waxa ay ahayd gobol katirsan dhulka uu ingiriisku ka gumeyto qaaradda Aasiya, ilaa baarlamankiisii uu soo saaray bishii Luulyo 1947dii qaanuunkii madax bannaanida hindiya, kaas oo dhigaayo in gobolada muslimiinta ubadan lagudaro bakistaan, halka gobolada hinduuska u badan lagudaro hindiya, iyadoo lagu saleynaayo rabitaanka dadka gobolladaas degan .

16. Sheeg isirka muslimiinta Barma?

Isirka muslimiinta Barma waa dad kasoo haajiray "bangaal".

17. Maxaa loo aqoon jiray miyanmaar ama baarmadii hore?

Waxaa loo aqoon jiray barmaaniya.

18. Sheeg magaala madaxda dalka miyanmaar?

Waa raaguun.

19. Waa imisa bedka iyo tirada dadka miyanmaar?

Bedka miyanmaar waa 680 kun km^2, tirada dadkeeduna waa 60 milyan.

20. Sidee ayuu islaamku ku soo gaaray miyanmaar?

Qarnigii labaad ee hijriyada koox ganacsato ah oo soo maray Aarakaan ayaa islaamka soo galiyey miyanmaar. Waxayna ahayd xilligii khaliifkii cabaasiyiinta ee Haaruun Al-tashiid .

21. Dadkii aarakaan boqortooyadii ay sameysteen meeqo sano ayey xukumeysay? Ku muuse ahaa boqorkoodii koowaad?

Waxey xukumeysay 360 sano, boqorkoodii koowaadna wuxuu ahaa Suleymaan shaah oo talada hayey 48 sano.

22. Waa qolamma ruhinguhu?

Waa dad muslimiin ah oo ku dhex nool dawladda miyanmaan oo ku taallo koofurta bari ee aasiya.

23. Caddee kaalinta ay culimada muslimiintu kulahaayeen in islaamku kufaafo koonfur-bari Aasiya?

Qarnigii 2aad ee hijriyada, koox ganacsato ah oo soo martey " aarakaan " ayaa islaamka soo gelisay Miyanmaar. Waxayna ahayd xilligii khaliifkii cabaasiyiinta ee Haaruun Al-tashiid .

24. Sheeg dhibaatooyinka heysta muslimiinta Barma?

- Shaqada oo laga ceyrinaayo.
- dhulalka iyo hantida musliimta oo lala wareegaayo .
- muslimiinta oo xabsiyada loo taxaabo.
- Machadyada iyo dugsiyada muslimiinta oo laxiro.

25. ka faalloo qadiyadda muslimiinta Barma ?

qaddiyada muslimiinta barma waa qaddiyad islaami ah, waana in lajoojiyaa isir sooca iyo xadgudubyada dawlada barma kula kaceyso muslimiinta barma in lasiiyo muslimiinta Rohinja xaqa dhalashada dalkaas .

Dooro Weedha Saxda ah:

1) Dadkii ugu horreeyay ee degay dhulka falastiin waxay ahayeen :

b) masaarida.

{ t } kancaaniyiinta.

j) faniiqiyiinta.

x) aaraamiyiinta .

2) Kancaan waxaa loola jeedaa :

{ b } Dhulka hooseeya.

t) dhulka buuraleyda.

j) Dooxooyinka.

3) waxaa lasameeyay ururka sahyuuniyadda caalamiga sanadkii :

{ b } 1897dii .

t) 1234.

j) 1896.

4) Balan'qaadkii belfoor waxuu dhacay sanadkii :

b) 1915.

t) 1912.

{ j } 1917dii.

5) Dawladda israa'iil waxaa lagudhawaaqey sandkii :

{ b } 14May 1948dii.

t) 1May 1945.

j) 5May 1950 .

6) Islaamku waxa uu soo gaarey kashmiir sanadkii :

b) 56 hijriyada.

{ t } 90 hijriyada.

j) 76 hijriga.

7) Ingiriiska waxa uu hindiya qabsadey sanadkii :

{ b } 1819kii.

t) 1880.

j) 1890.

8) Qaanuunkii madax bannaanida hindiya waxa uu soo baxey sanadkii :

b) 1945.

{ t } 1947dii.

j) 1955 .

9) Dagaalkii ugu horeeyay ee bakistaan iyo hindiya waxa uu dhacay sanadkii :

{ **b } 1949kii.**

t) 1945.

j) 1920.

10) Dawlada Miyanmaar waxa ay ka go'day maamulkii ingiriiska ee hindiya sanadkii :

b) 1927.

t) 1930.

{ j } 1937dii.

11) Dagaalkii 2aad ee bakistaan iyo hindiya waxa uu dhacay sanadkii :

{ b } 1965tii.

t) 1960.

j) 1955.

12) Dawladii barma waxa ay qabsatay gobolka aarakaan (dhulkii islaamka) sanadkii :

b) 1780.

{ t } 1784tii .

j) 1770.

13) Miyanmaar waxa ay kutaalaa :

{ b } Koonfur- bari Aasiya.

t) waqooyi-bari Aasiya.

j) koonfir-bari Afrika .

14) boqorkii ugu horeeyay ee gobolka aarakaan waxa uu ahaa :

b) cali shaah .

{ t } Suleymaan shaah .

j) maxamad Al faatix .

TAARIIKH

Cutubka-3aad-Su'aalo & jawabo:

1) Qeex ereyga dawladnimo gaarsiin?

Dawladnimo gaarsiinta: waa qaab ka mid ah qaababkii ay curiyeen dawladihii ku adkaaday dagaalkii 2aad ee adduunka, si loogu beddelo habkii hore ee hoosgaynta.

2) Sheeg loolankii dawladaha waawayn kudhexmaray dawladnimo gaarsiinta soomaaliya?

Koonfurta soomaaliya waxaa katalinayay maamulkii ciidan ee Ingiriiska laga soo bilaabo 1941dii, waxaa loollan adag dhex maray Ingiriiska oo markaas gacanta ku hayay iyo Talyaaniga oo horay u'gumaysan jiray, balse golaha guud ee Qaramada midoobay waxa uu go'aamiyay in soomaaliya la hoos geeyo habka dawladnimo gaarsiinta, muddo 10 sano ah kidibna ay hesho Madax-bannaanideeda.

3) Sheeg halka ay ku dambeeyeen gobolladii la'hoosgeeyay dawladnimo gaarsiinta Qaramada midoobay?

Qaramada midoobay waxa ay baabi'isay hawlihiisii bishii Nofembar 1994tii, heshiiskii dawladnimo gaarsiinta ee gobollada.

4) Sheeg sababta Qaramada midoobay u hakisay hawlihii golihii dawladnimo gaarsiinta?

Sababta ayaa ahayd, Mar haddii aanay jirin gobollo ku haray gacanta golaha dawladnimo gaarsiinta, ayaa waxaa la laalay hawlihiisii .

5) Falanqee wixii uu xambaarsanaa go'aankii dawladnimo gaarsiinta soomaaliya?

Waxa uu qorayay :

- In lahorumariyo arimaha siyaasadda
- In la kobciyo dhaqalaha gobolka
- In la horumariyo adeegyada guud sida caafimadka iyo waxbarashada.
- In la dhiso gole la tashi oo maamulka kala tashado arimaha dalka.
- In ladhiso ciidan qaran iyo ciidan boolis ah si loo sugo amniga.

6) Sheeg mudnaanta midnimadu u leedahay horumarka dalka?

Waxay u leedahay Amni iyo xasi'looni in uu helo, in uu dhismo dalka, iyo in uu awood yeesho dalka horumarne kutalaabsado .

7) Is bar bar dhig labadii maamul ee Rayidka iyo ciidanka ?

Maamulka rayidka: soomaaliya taladeedu waxa ay ku dhisnayd in si dimoqraadi ah la isku soo doorto, sidaas awgeed cidna uma baahanayn in ay hub qaadato si ay talada dalka u beddesho. ***Maamulkii ciidanka:*** cidna fursad uma siin in ay si nabad ah awoodda ugala wareegto, taas oo keentay in jabhado hubaysan isku dayaan in ay xoog talada uga tuuraan, waxa ayna keentay in la dumiyo dhammaan wixii soomaalidu muddo 30 sano ka badan dhisanaysay.

8) Sharax sababihii dhaliyay afgambiga (kacaanka) ciidan ee soomaaliya ?

Sababtuna waxa ay kusheegeen in laladagaalanno Musuq-maasuqa iyo dulmiga bulshada kadhex jiray, sidaa waxaa yiri guddoomiyaha golaha sare ee kacaanka Janaraal Maxamed siyad barre.

9) Sheeg guulihii kacaanka talada ciidanka ee soomaliya?

Guulaha kacaanka waxa kamid ahaa fulinta mashaariic dhaqaale ee dhinacyada warshadaha, beeraha , xolaha, dhinaca arimaha bulshada waxbarashada iyo caafimaadka .

10) Sheeg maxaa kamid ahaa gaabiskii talada ciidanka ee soomaaliya?

- In uu laalay dastuurkii iyo xeerarkii dalka.
- In uu baabi'iyay dhammaan hay'adihii dastuuiga ahaa.
- In uu kala diray golihii sare, kuna beddalay xisbigii hanti wadaaga.
- In uu soo saaray xeerkii qoyska, culimadii diidayna toogtay .

11) Sheeg tallaaboyinkii ugu horreeyay ee dawladda soomaaliya ku dhaqaaqday?

Barlamaankii midnimada ayaa, xaaji bashiir ismaciil u doortay gudoomiye kumeel gaar ah, sido kale Madaxweyne kumeel gaar ah u doortay Aadan cabdulle cusmaan "Aadan cadde " waxa ayna soomaaliya xubin buuxda kanoqotay Qaramada midoobay .

12) waa maxay Kacaan ?

Waa isbeddel saameeya dhinacyada siyaasadda iyo bulshada horseedna ka yahay dadweyne

13) Waa maxay Afgembi ?

Waa koox talada dal xoog kula wareegta oo gembisa hannaankii maamul ee horay u jiray .

14) Kumuu ahaa halyey xalane ?

Maxamed cabdulle xalane waxa uu ahaa Laba xiddigle katirsan ciidanka xoogga dalka soomaaliyeed .

15) Sheeg hadalladii waddaniyadda xambaarsanayd ee intuu dhiman kahor kula dardaarmay saaxiibadiis halyeey xalane?

Waxa uu dhahay " Cadowgu bir ma aha ee burburiya , ilaashada dhulkiina iyo calankiina " .

16) Goorma ayaa lagadhigay doorashada dalka Laba heer in ay noqoto ?

waxay ahayd xilligii golihii 5aad 1955tii .

17) Goorma ayaa la go'aamiyay in golaha laga dhigo gole sharci dejin ah?

waxay ahayd 1955tii .

18) Doorashooyinkii laqabtay bishii maarso 1956dii imisa kursi ayey heleen xisbiga SYL?

Xisbiga SYL ayaa helay 43 kursi oo kamid ah 70kii kursi .

19) Sheeg hadalkii Madaxwayne Jamaal cabdinaasir oo kuyiri wafdigii soomaaliyeed ee la socday maydka mar xuum Kamaaluddiin saalax?

Waxa uu yiri " Masar waxaa jooga 27 malyan oo dhammaantood diyaar u ah in ay u dhintaan xornimada iyo madax- bannaanida soomaaliya " .

GOOBO GALI WEERTA SAXDA AH:

1) Waxa ay midoobayn labada gobol Waqooyiga iyo koonfurta :

b) 26dii maarso 1960kii

{ t } 1dii Luulyo 1960kii.

j) 26dii june 1960kii .

2) Hab-Maamulkii Rayidka waxa uu katalinayay dalka ilaa :

b) 1960-1965tii

t) 1960-1967dii

{ j } 1960-1969kii.

3) Hab-Maamulkii ciidanka waxa uu dalka katalinayay ilaa :

{ b } 1969-1991dii.

t) 1960-1990kii

j) 1965- 1991 .

4) Qaramada midoobay dawladnimo gaarsiinta waxa ay baabi'isay sannadkii :

b) 1990kii

{ t } 1994tii

j) 1999kii .

5) dawladnimo gaarsiinta waxaa curiyay :

b) dawladihii adkaaday dagaalkii 1aad ee adduunka .

t) dawladihii adkaaday dagaalkii 3aad ee adduunka .

{ j } dawladihii adkaaday dagaalkii 2aad ee adduunka .

6) Talyaanigu waxa uu kala wareegay Ingiriiska koonfurta soomaliya :

{ b } Abril 1950kii.

t) febraayo 1960kii .

j) maarso 1970kii .

7) Mudanihii ugu horeeyay ee kahadlay golaha wadatashiga hortiisa waxa uu ahaa :

b) Guuleed Axmed cali .

{ t } C/raxmaan cali ciise .

j) Maxamed caynaanshe guuleed.

8) Afgembigii kacaanka waxa uu dhacay :

b) 21 octoobar 1961dii .

t) 25 nofembar 1960kii.

{ j } 21 octoobar 1969dii .

9) Xeerkii u horreeyay xilligii talada ciidanka waxa uu soo baxay sannadkii :

{ b } 1979kii .

t) 1970kii .

j) 1960kii .

10) Baaqii loogu magac daray MAANAFEESTO waxaa la soo saaray sannadkii :

b) May 1995tii .

{ t } May 1990kii .

j) juun 1980kii .

11) bishii juun 1964tii waxaa Ra'iisul wasaare loo magacaabay :

b) c/rashiid cali sharmaarke.

t) Maxa'ed xaaji ibraahim cigaal .

{ j } C/risaaq xaaji xuseen .

12) Dilkii kamaaluddiin saalax waxa uu dhacay sannadkii :

b) 15kii Abril 1950kii .

{ t } 16kii Abril 1957dii.

j) 20 juun 1955tii .

TAARIIKH

CUTUBKA 4aad- SU'AALO & JAWAABO

1) Sheeg sababihii dhaliyay dhaqdhaqaaqa Mahdiga ?

Waxaa dhaliyay kacdoonadii ugu caansanaa taariikhda suudaan iyo tan Afrika guud ahaan , markii ay xukuumadda Ingiriiska kusoo rogtay canshuuro tiro badan , taas oo keentay in uu soo ifbaxo dhaqdhaqaaqii Mahdiga Suudaan .

2) Sheeg dhacdooyinkii taariikheed ee dhaqdhaqaaqii Mahdiga Suudaan?

- Mahdiga suudaan waxa uu jabiyay ciidamada Ingiriiska .
- Waxa uu dagaalo adag lagalay Maamulkii katalinayey Khartuum ee Masar .

3) Sheeg sababihii uu kuguulaystay Mahdiga suudaan ?

Waxa uu taageero ballaaran kahelay shacabka suudaan isaga oo ka helay awood usuura gelisay jabinta ciidamada Ingiriiska iyo Maamulkastoo kahoryimaada .

4) sharax kabixi taariikhdii Cumar Mukhtaar ?

Cumar Mukhtaar waxa uu dhashay sanadkii 1862dii , kuna dhashay tuulada Janzuur ee bariga Liibiya , waxa uuna kasoo jeedaa qabiillada ugu waaweyn bariga Liibiya , waxa uu kubarbaaray agoonnimo , waxa uu muddo 8 san ah baranayay culuumta shareecada ee kala duwan , sida Fiqiga , Xadiiska , Tafsiirka , iyo kuwa kale uu kabaranayay culimada ugu waaweyn .

5) Sheeg sababihii dhaliyay dhaqdhaqaaqa Cumar Mukhtaar ?

Waxaa dhaliyay dhaqdhaqaaqa Cumar Mukhtaar , Markii uu yimid gumaystaha waxa uu kubiiray dadkii u istaagay la dagaalanka cadawga .

6) Sheeg dagaaladii Cumar Mukhtaar sida ay isugu xigeen?

Dagaalkii ugu horeeyay waxa uu lagalay Ingiriiska xuduudda Liibiya iyo Masar deegaanka Birdiya iyo saluum , sido kale waxa uu ka qayb galay dagaalkii dhexmaray Sanuusiyiinta iyo Faransiiska , 1911dii waxaa bilowday halgankii uu lagalay Talyaaniga .

7) Sheeg maxaa ka mid ahaa hadalladii qiimaha badnaa ee Cumar Mukhtaar ?

" Annagu is dhiibi mayno , waan guulaysaneynaa ama waan dhimanaynaa "

" Xukun waa kii Eebbe ee ma aha kiina dhalanteedka ah ".

8) Sheeg sababihii keenay kacdoonkii Azhar ee Masar ?

Waxaa dhaliyay kacdoonkii Azhar ee Masar imaatinka Faransiiska ee Masar 1dii Luulyo 1798dii , maxaa yeelay Culimada Azhar iyo Ardaydooduba waxa ay ka hortagen Faransiiska .

9) Tilmaam dadkii kadhex muuqday kacdoonkii Azhar ?

1) Muraad Beek
2) Ibraahim Beek ,
3) Sheekh Cumar Makram
4) Sheekh cabdullaah sharqaawi
5) sheekh saadaat .

10) Goorma ayuu bilowday dhaqdhaqaaqii ugu horeeyay ee Azhar ?

Waxa uu dhacay 21dii Oktoobar 1798dii oo ka bilowday agagaarka masjidka Azhar .

11) Sheeg qaar kamid ah dagaaladii ay Azhar hoggaaminaysay ee Qaahira ka dhacay ?

Dad gaaraya 15000 qof oo isugu jira ardey iyo dadka deggan Qaahira , ayaa weerar ku qaadeen Janaraal Diibwii oo ah xaakimka Qaahira iyo ciidan lasocday , weyna dileen isaga iyo in badan oo ka mid ciidankii lasocday, waxayna qabsadeen meelaha magaalada laga soo galo .

12) Tilmaam falalkii foosha xumaa ee gumaysiga markii uu galay Azhar ?

- Faransiiska waxa uu si ku talagal ah u boobay kutubtii tiilay masjidka .
- Masaaxiftiina ay ku burburiyeen kabahooda iyaga iyo Yuhuudii ay u soo wateen in ay u turjumaan .

13) Sheeg guddoomiyahii golaha kacdoonka ee Azhar ?

waxa uu ahaa " Sheekh Saadaat " .

14) Sheeg hoggaankii kacdoonkii Qaahira ee ka soo hor jeeday Faransiiska ?

Waxa ay ahaayeen " Culimda Azhar " .

15) Sheeg hoggaamiyihii ururkii dhaqdhaqaaqa koonfur Afrika ?

Waxa uu ahaa " Nelson Mandeela " .

16) Sheeg isirka dadka deggan koonfur Afrika ?

1) Caddaan tiradooda lagu qiyaaso 5 milyan.
2) Dadka aan caddaanka ahayn oo lagu qiyaaso 24 milyan
3) kuwo iska dhal ah oo 4 milyan lagu qiyaaso iyo Aasiyaan.

17) Sheeg hoggaamiyahii ururka African National congress (ANC)?

Waxaa hoggaaminayay "Nelson Mandeela" .

18) Tilmaam wax yaabihii uu qabtey ururka (ANC) ?

4) Ololaha la dagaalanka midab kala sooca
5) dhanka waxbarashada oo socdey intii udhaxeysay 1953-1955tii
6) Ololaha shaqo ka fariisiga baabuurta safarrada .

19) Sheeg goorma ayaa la asaasay ururka ANC ?

Waxaa la asaasay sanadkii 1912dii isaga oo markaas la magac baxay golaha waddaniga ee koonfur Afrika ujeedadiisana waxa ay ahayd gaarsiinta xukuumada codka Afrikaanka .

20) Goorma ayey dhacday doorashadii ugu horraysay oo ka madax bannaan midab kala sooc?

Waxa ay ahayd bishii Abril sanadkii 1994tii .

21) Goorma ayuu ku biiray Mandeela garabka difaaca xuquuqda dadka madowga ee (ANC) ?

Waxa uu kubiiray sanadkii 1942dii .

22) Sanadkee ayaa xabsiga la dhigay Mandeela ?

Waxaa la xiray sanadkii 1961dii .

23) Maxay ahayd fariintii 1980kii oo Nelson Mandeela u soo direy Golaha Qaranka Afrika ?

Waxa ay ahayd oo uu ku yiri " Midooba, diyaar garooba, ku dagaallama inta u dhexeeya bannanbax iyo iska caabin hubeysan waxa aan burburin doonnaa midab-kala-sooca " .

24) Maxaa loo soo jeediyay Nelson Mandeela 1985tii ?

Waxaa loo soo bandhigay in uu xabsiga ku beddesho joojinta iska caabinta hubeysan, wuuna diiday soo jeedintaas, waxa uuna kusii jiray xabsiga ilaa 11kii Febraayo 1990kii, xilligaas oo ay mira dhashay dhabar adaygii Mandeela iyo ururkiisa .

25) Yaa xabsiga ka'sii daayay Nelson Mandeela ?

Mandeela waxaa lagu sii daayay amarka madaxweynihii xilligaas Dekalark .

26) Sheeg sababaha dhaliyaya dhaqdhaqaaqa xoraynta koonfur Afrika ?

Waxaa dhaliyay markii ay waayeen dadkii ku noolaa koonfur Afrika midowgoodii iyo wada jirkoodii fiicnayd an lahayn midab kala sooca .

TAARIIKH

CUTUBKA 5aad - SUAALO & JAWAABO

1. Sheeg sababaha dhaliyay kacaankii Ruushka ?

1. Waxaa kamid ahaa guuldarradii ay Jabaanku gaarsiiyeen
2. Xukunka oo keli talis ahaa
3. Dhibaatooyinka beeraha oo ka mid ahaa sababihii ugu muhiimsanaa ee dhalashada kacaanka Ruushka
4. Dhibaatooyin dhaqaale oo jiray .

2. Sheeg Mabaadii'da ka dambaysa kacaankii Ruushka ?

Mabaadii'daas waxaa ka dambeyay Xisbiyada Mucaaradka iyo Ururada caanka ahaa sida :

- ✓ Xisbiga shaqaalaha hantiwadaagga
- ✓ Xisbiga xoogagga ilaalada cas
- ✓ Xisbiga caalamiga ah ee Menshefik .

3. Sheeg dadka ugu muhiimsanaa ee ka qayb qaatay kacaanka Ruushka ?

Waxaa ka mid ahaa Torotiski , iyo Faladamiir Linin .

4. Sheeg sababihii dhaliyay dagaalkii 2aad ee Adduunka ?

1. Is-ballaarinta Jabbaan .
2. Faashiistah
3. Hitler iyo xisbigiisii naasiga
4. Dhaqaale xumadii weyneyd .
5. Heshiiskii Fersaylis ee la gaaray dhamaadkii dagaalkii 1aad adduunka kadib ee u dhaxeeyay Jarmalka iyo xulufadii.

5. Sheeg dhacdooyinka dagaalkii 2aad ee Adduunka ?

- Hitler ayaa qabsaday Austriya bishii Maarso 1938 waxa uuna ku daray Jarmalka.
- Hitler ayaa weerar ku qaaday midowgii soofiyeeti bishii Juun 1941.
- 1942dii Ciidamada Jabbaan ayaa lagu jabiyay dagaalkii Midway.
- Bishii sibtember 1939, Ciidamada Jarmalka ayaa ka tallaabay soohdinta Booland.
- Taliyihii Jarmalka Roomeel waxaa lagaga adkaaday dagaalkii Al-calamayn .
- Disember 1944tii Ruushka waxa ay ka tallaabeen soohdinta Jarmalka markii ugu horreysay.
- Hitleer ayaa is-dilay bishii Abril 1945tii , kadib Jarmalka waxa ay saxiixeen dukumintiyada is dhiibidda si shuruud la'aan ah.
- Waxaa laba bam lagu riday magaalooyinka Hiroshiima iyo Nagasaaki kadib waxaa soo afjarmay dagaalkii 2aad ee Adduunka 6 sano dagaalo socdey.
- waxaa ku dhinteen dad ku dhow 62 milyan oo qof oo isugu jira dad rayid ah iyo ciidamada.
- Khasaaraha maaliyadeed aad ayuu badnaa maadaama ay burbureen warshadihii.
- waxaa dhacay hoos u dhac dhaqaale dhamman dalalka Yurub .

6. Tilmaan natiijooyinkii siyaasadeed ee dagaalkii 2aad ee Adduunka ?

1. Khariirad cusub oo reer Yurub ah ayaa la soo saaray iyadoo lagu saleynayo labada awoodood ee ah Midowgii soofiyeeti iyo Mareykanka si loo hoggaamiyo adduunka .
2. Mareykanka ayaa isku dayay isaga oo u maraya Qaramada midoobay in uu la dagaallamo quwadaha reer Yurub oo ay sii kordhaysay saameyntooda is-ballaarinta dibadda gaar ahaan Ingiriiska iyo Faransiiska .

7. Sheeg dagaalladii ka dhex qarxay dadyowga carabta iyo Sahyuuniyadda ?

Waxaa dhexmaray dagaalo kala duwan sida :

- ✓ Dagaalkii dhacay 1948dii dhanka carabta looga yiqiin dagaalkii Falastiin , Israa'iil waxa ay ugu magac dartay " Dagaalkii Xornimada " .
- ✓ Dagaalkii dhexmaray 1956dii waxaa loo yiqiin " Duullaankii saddex geesoodka ahaa " .
- ✓ Waxaa dhexmaray dagaalkii dhacay 1967dii waxaa carabta looga yaqaan magaca ah Dib-u-Dhac , halka Israa'iil iyo qoraallada dawliga ahi ay ugu yeeraan "Dagaalkii Lixda Maalmood"
- ✓ Waxaa dhexmaray dagaalkii dhacay 1973dii looga yaqaan xagga carabta 6da Oktoobar ama 10kii Ramadaan , halka Israa'iil ay ugu magac dartay " Dagaalka Ciiddii Dembi Dhaafka " .
- ✓ Waxaa dhexmaray dagaalkii dhacay 1982dii loona yaqiin dagaalkii Lubnaan ama duullaankii Lubanaan , inkasta ay oo ilaha qaar aysan u tixgelin in uu ahaa " iska hor'imaad hubeysan oo weyn " .

8. Sheeg Natiijooyinka dagaalladii u dhaxeeyay dadyowga Carabta iyo Sahyuuniyadda ?

- ✓ Tilmaamaha guud ee dagaalladan waxa ay bixinayaan in hal dagaal ugu yaraan uu ahaa mid u dhamaystiran hawlihiisii iyo himilooyinkiisii siyaasadeed, kaasoo ah dagaalkii 1948dii, halka afarta dagaal ee kale ay xaddidnaayeen.
- ✓ Dhammaan dagaalladaas waxaa ka dhashay natiijooyin istiraatiiji ah oo ay ku samaysmeen khariidado iyo aragtiyo cusub .

9. Maxuu sababay dagaalkii dhexmaray carabta iyo Sahyuuniyadda 1948dii ?

Dagaalkii 1948dii waxa uu sababay asaasidda Israa'iil iyo dhibaatada dadka reer falastiin oo yeelatay dabeecad adag, oo aanay wali dhammaan raadkeeda .

10. Maxuu horseeday dagaalkii dhacay 1967dii ?

Dagaalkii 1967dii waxa uu horseeday fiditaanka baaxadda dagaalka iyo israa'iil oo raad ku yeelatay dhawr dal oo carbeed oo ay israa'iil qabsatay dhulalkooda .

11. Qeex Dagaalkii Qaboobaa ?

Dagaalkii qaboobaa waxa uu ahaa isku dhac aan toos ahayn oo dhexmaray labadii quwadood ee ugu weynaa adduunka- Mareykanka iyo Midowgii Sofiyeeti .

12. Sheeg sababta ugu weyn ee keentay in uu dillaaco dagaalkii Qaboobaa ?

Waxay ay ahayd u qaybinta adduunka laba isbahaysi oo kala ah , Shuuciyad iyo Siyaasadda furan , oo ay kala hogaaminayeen Midowgii Soofiyeeti iyo Mareykanka .

13. Sheeg dhacdooyinka taariikhiga ah ee ugu muhiimsan ee dhacay dagaalkii Qaboobaa ?

- Xilligii dagaalkii Qaboobaa Reer Yurub waxa ay isu aragtay in ay u kala qaybsan tahay laba isbaheysi oo waaweyn oo uu u dhaxeeya isku dhac siyaasadeed oo caalami ah oo loo yiqiin " Dagaalkii Qaboobaa "
- Dhimashadii hoggaamiya Soofiyeeti Josef istaalin sanadkii 1953dii, waxaa soo muuqatay isbeddel muhiim ah ee xiriirka labada isbaheysi ee dunida.
- Burburkii Midowgii Soofiyeeti sanadkii 1991dii kadib adduunku waxa uu galay heer cusub oo uu hoggaaminayo hal isbaheysi oo ah Mareykanka .
- Qalalaasaha Kuuba ee 1962dii, waxa uu ahaa iska hor'imaadkii ugu muhiimsanaa oo dunida ku dhowaatay in hubka Nukliyeerka la isku adeegsado .

14. Sheeg xilligii uu dhammaaday dagaalkii labaad ee dunida ?

Waxa uu dhammaaday sanadkii 1945 .

15. Sheeg xilligii uu bilowday dagaalkii Qaboobaa ?

Waxa uu bilowday kadib dagaalkii Dunida ee 2aad .

TAARIIKH

CUTUBKA - 6aad - SUAALO & JAWAABO:

1) Sheeg xaaladihii lagu aasaasay Ururka Qaramada Midoobay ?

Fikradda ah in la sameeyo Qaramada Midoobay waxa ay soo bilaabatay intii uu socday dagaalkii 2aad ee dunida , kadib markii uu Ururkii Ummadaha ku guul darreystay in uu wax kaqabto Nabadgelyada caalamka , waxaana lagu asaasay rabitaanka bulshada caalamka, ee la xariirta arimaha ilaalinta nabadda iyo nabadgelyada caalamiga .

2) Tilmaan hawlaha Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ?

- Tixgelinta iyo ansixinta miisaaniyada Qaramada midoobay iyo jaangooynta saamiga maaliyadeed ee loo qoondeeyay dawladaha xubnaha ah .
- Tixgelinta mabaadii'da guud ee nabadeynta , iyo iskaashiga caalamiga iyo katala bixintooda .
- Tixgelinta warbixinada laga helo Golaha Ammaanka iyo hay'adaha kale ee Qaramada Midoobay .

3) Sheeg qaab-dhismeedka ama hay'adaha Ururka Qaramada Midoobay ?

Qaab-dhismeedka Ururka Qaramada midoobay waxa uu ka kooban yahay :

- ✓ Golaha Guud
- ✓ Maxkamadda Caalamiga ah ee Caddaaladda
- ✓ Golaha dawladgaarsiinta
- ✓ Xoghaynta Guud
- ✓ Golaha dhaqaalaha iyo bulshada .

4) Immisa dawladood ayey ka kooban tahay Golaha Guud ee Qaramad Midoobay ?

Waxa ay ka kooban tahay 193 dawladood, oo dhammaantood u siman xagga matalaadda .

5) Muxuu sheegayaa Axdi-qarameedka hawlaha Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ?

Waxa uu sheegayaa sida ku cad qodobka 4aad ee Axdiga, in uu ka kooban yahay 15 xubnood oo kala ah:

1. Xubnaha Golaha guud ee Qaramada Midoobay ee shanta Qaaradood .

2. Kooxda dalalka Afrika 3. Kooxda dalalka Aasiya 4. Kooxda dalalka Yurubta Bari .

5. Kooxda dalalka Laatiin Ameerika iyo Gobolka Badda Kariibiyaanka

6. Kooxda dalalka Yurubta galbeed iyo dalal kale .

6) Sheeg shaqada Golaha Ammaanka ?

Waa golaha mas'uulka ka ah ilaalinta nabadda iyo nabadgelyada caalamka .

7) Goorma ayaa la asaasay Maxkamadda caalamiga ah ee caddaaladda ?

Waxaa la asaasay sanadkii 1945 , waana waaxda garsoorka ee ugu weyn Qaramada Midoobay , xarunteedana waa magaalada Heeg ee dalka Holand .

8) Maxuu ka kooban yahay Golaha dawlad garsiinta ee Qaramada Midoobay ?

- Shanta xubin oo joogtada ah ee Golaha Ammaanka .
- Xubnaha maamula dalalka loo diyaarinayo madax-bannaanida .
- Tirada xubanaha loo baahan yahay si loo damaanad qaado xuquuqda dhinacyada .

9) Waa maxay shaqada ay qabato Xoghaynta guud ee Qaramada Midoobay ?

Waxa ay qabataa dhammaan hawlo maalmeedka Ururka .

10) Sheeg xaaladihii ay ku sameysmatay Ururka Jaamacadda Carabta ?

Fikraddan ayaa ku saleysan in xaaladda muslimiinta dib loo habeeyo lana mideeyo si ay uga hortagaan gumeysiga .

11) Sheeg Ujeedooyinka Jaamacadda Carabta ?

Ka gudubidda caqabadaha ku aaddan barnaamijyada siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo dhaqan .

12) Sheeg dalalka xubnaha ka ah Ururka jaamacadda Carabta ?

Dawladaha Xubnaha ka ah Ururka jaamacadda Carabta hadda waa 22 dal oo kala ah :

Masar, Urdun, Ciraaq, Suuriya , Lubnaan , Sacuudi Carabiya , Yaman , Liibiya , Suudaan Marooko , Tuunisiya , Kuweyt , Aljeeriya , Baxrayn , Qadar , Imaaraadka , Cummaan , Muritaaniya , Soomaaliya , Falastiin , Jabuuti , Komoros .

13) Tilmaan qeybaha ugu weyn ee Jaamacadda Carabta ?

- Golaha Jaamacadda
- Xoghaynta Guud
- Guddiyada joogtada ah iyo hawlahooda .

14) Sheeg Xarunta Ururka Jaamacadda Carabta ?

Ururka Jaamacadda Carabta xaruntiisa waa Qaahira .

15) Sheeg xarunta Ururka Qaramada Midoobay ?

Xarunta Ururka Qaramada Midoobay waa magaalada New York .

16) Sheeg Ujeedooyinka Jaamacadda Carabta ?

- Ka gudubidda caqabadaha ku aadan barnaamijyada siyaasadeed.
- Xallinta khilaafaadka ka dhex dhasha xubnaheeda .

17) Sheeg ujeeddooyinka Ururka Midowga Afrika ?

1. in Afrika si buuxda looga xoreeyo gumeysiga
2. in la xoojiyo iskaashiga Afrika
3. in laga shaqeeyo kor u qaadidda magaca Afrika
4. in meesha laga saaro dib u dhaca ku yimid dhaqaalaha Afrika .

18) Sheeg qaab-dhismeedka uu Ururka midowga Afrika ka kooban yahay ?

1. Golaha madaxweynayaasha dalalka
2. Golaha wasiirrada
3. Xoghaynta Guud
4. Guddiga dhex-dhexaadinta khilaafaadka .

19) Sheeg Caqabadaha gudaha iyo dibadda uu la kulmay Ururka Midowga Afrika ?

1. Halganka loo galay madax-bannaanida dalalka harsan ee Afrika .
2. Dhismaha dawlad qaran oo is haysata .
3. Kobcinta dhaqaalaha .
4. Ka hor tegidda raadadkii gumeysiga iyo midab kala sooca .

20) Sheeg Xaaladihii uu ku sameysmay Ururka shirweynaha islaamka ?

Fikradda asaasidda Ururka shirweynaha islaamka waxa ay dhalatay markii uu madaxweynihii soomaaliya Aadan cabdulle cismaan usoo jeediyay Boqorkii sacuudiga boqor Faysal sanadkii 1967dii in la sameeyo Urur islaami ah, wuuna aqbalay boqor Faysal .

21) Immisa dal ayaa kujiraan Ururka shirweynaha islaamka ?

Waa Urur goboleed caalami ah oo ay ku jiraan 57 dal oo islaam ah , xaruntiisa ee ku meel gaarka ahne waa magaalada Jeddah .

22) Tilmaan himilooyinka Ururka Shirweynaha islaamka ?

1. Ujeeddo siyaasadeed
2. Ujeeddo dhaqaal
3. Ujeeddo bulsho .

23) Sheeg hay'adaha uu ka kooban yahay Ururka shirweynaha islaamka ?

1. Golaha sare
2. Golaha wasiirada Arrimaha dibadda
3. Xoghaynta Guud .

TAARIIKH

CUTUBKA - 7aad - SUAALO & JAWAABO:

1. Qeex dastuur?

Waa mabaadi'da asaasiga ah oo la soo uruuruyey kuwaas oo salka ku haya habeynta awoodaha iyo caddeynta xuquuqaha dadka ku jira oo dhan.

2. Sheeg noocyada dastuurka?

1. Dastuur la badali karo
2. Dastuur adag
3. Dastuur qoran
4. Dastuur aan qornayn
5. Dastuur faah-faahsan
6. Dastuur kooban
7. Dastuur ku meelgaar ah

3. Halkuu ka soo baxaa dastuur?

1. Diinta
2. Dhaqanka
3. Bulshada
4. Dhaqaalaha
5. Xaaladda siyaasadeed

4. Sheeg heerarka wax ka badalka dastuurka?

1. Heerka soo jeedinta wax ka badalka
2. Heerka ogolaanshaha wax ka badalka
3. Heerka diyaarinta wax ka badalka
4. Heerka ansixinta wax ka badalka

5. Waa maxay maxkamadda dastuuriga ah?

Waa maxkamadda sare ee garsoorka oo ku takhasustay xalinta khilaafaadka dastuurka, shuruucda iyo go,aanada garsoorka. Go,aannaduna waa kama danbeys aan la burburin karin.

6. Qeex sharciga?

Waa qawaaniin hagaya nolosha dadka isla markaana habeeya xariirka dhexdooda iyo xariirka ay la leeyihiin dawladda iyo laamaheeda oo dhan iyo sharciga.

7. Sharax xariirka ka dhexeeya sharciga iyo bulshada?

Sharciga ayaa muhiim u ah bulshada maxaa yeelay waxaa ku jira:

- Ilaalinta xasiloonida bulshada dhexdeeda
- Xalinta khilaafaadka ka dhex dhici kara dadka iyo hey,adaha.
- In la habeeyo arrimaha kala duwan ee nolosha dadka
- Ka ilaalinta lunsashada hantida guud

8. Tax ujeedooyinka sharciga?

1. Guul gaarista amniga dadka
2. Xaqiijinta cadaaladda dadka dhexdooda
3. Xaqiijinta xasiloonida
4. Xaqiijinta ujeedooyinka dhaqaalaha
5. Xaqiijinta ujeedooyinka siyaasadda

9. Qeex shuurada iyo dimuquraadiyadda?

Shuuradu waa helidda aragtida ummadda ama cid kasta oo ay u wakiilatay danaheeda guud.

Dimuquraadiyadduna waa eray girig ah oo ka kooban labo qeyb oo kala ah (demos) oo micneheedu yahay dad ama ummad (cratic) oo micneheedu yahay xukun. Sidaa daraadeed demuquraadiyaddu waa xunkanka dadka ama xukunka inta badan.

10. Sheeg tiirarka diimuquraadiyadda aduunka?

1. Doorashooyinka
2. Dulqaadashada siyaasadeed
3. Sareynta qaanuunka ama sharciga
4. Xoriyadda fikirka
5. La xisaabtanka iyodaah furnaanta
6. Baahinta xukunka
7. Bulshada rayidka

11. Goorma ayey soo bilowdeen xisbiyada siyaasadeed?

1850kii

12. Waa maxay xisbi siyaasadeed?

Waa koox dad ah oo isku raacay aragti siyaasadeed rabana in ay talada qabsadaan, si ay awoodda oo dhan ugu fushadaan ujeedo ay rabaan in ay gaaraan.

13. Sharax xaaladaha ay ku abuurmeen xisbiyada siyaasadeed ee soomaaliya?

Waxa ay ka soo bexeen ururkii shaqaalaha ee xeebta soomaaliyeed, ururrada samafalka ee waqooyiga, ururkii ardayda soomaaliyeed ee koofurta, waxa ayna soo shaac bexeen dagaalkii labaad kadib dhammaadkii afartameeyadii iyo bilowgii kontamaadkii ee qarnigii 20aad.

14. Sheeg astaamaha iyo heerrarka ka-qeybgalka siyaasadda?

1. Waxqabad
2. Tabarucid
3. Xulasho